

## Tallaaka COVID-19–

### Macluumaad caafimaadka iyo badbaadada ah oo loogu talagaley shaqaalaha

#### Ma laygu khasbi karaa inaan qaatid talaalka?

Laguma khasbi karo inaad qaadatid tallaalka ama aad maretid nidaam caafimaad adigoo dooneynin.

Si kastaba ha noqotee, xaaladaha qaarkood, waxaa jiri kara amarro [caafimaadka dadweynaha ah](#) oo kaaga baahan in lagaa tallaalo si aad uga shaqeysid shaqooyinka khatar sare leh. La soco talooyinka wakaaladaada caafimaadka.

#### Loo-shaqeeyahaygu ma i weydiisan karaa in la iga tallaalo COVID-19 iyadoo la raacayo shuruucda caafimaadka iyo badbaadada shaqada?

Shaqaalaha badankood, loo-shaqeeyahaagu uma baahna inuu ka codsado in lagaa tallaalo marka loo eego sharciga shaqada iyo badbaadada.

Haseyeeshee, waxaa jiri kara waxyaabo ka reeban, gaar ahaan haddii aad ka shaqeysid shaqooyin ay halisteedu badato. Waxa kale oo jiri kara [amarro caafimaadka dadweynaha](#) oo gaar ah oo u baahan in lagaa tallaalo.

Haddii loo-shaqeeyahaagu kaa dooneyo in lagaa tallaalo, waa inay ku siiyaa macluumaad iyo qalab aad ku gaadhid go'aan aqoon ku saleysan. La hadal dhakhtarkaaga haddii aad wax ka welwelsan tahay. La xidhiidh [shaqaalahaaga xakamaynta caafimaadka iyo badbaadada](#), wakiilka caafimaadka iyo badbaadada (HSR) ama ururka shaqaalaha si aad u heshid caawimo.

Macluumaadka ku saabsan xuquuqdaada goobta shaqada, kala hadal [Fair Work Ombudsman](#).

#### Ka waran waajibaadkayga ka shaqaale ahaan xagga sharciga shaqada iyo nabadgelyada? Ma waxa tani macnaheedu tahey in la i tallaalo?

Shaqaaale ahaan, waa inaad si macquul ah u daryeeshaa naftaada oo aanad sameynin wax si xun u saameeya caafimaadka iyo badbaadada dadka kale ee shaqada jooga. Waa inaad raacdaa tilmaamaha macquulka ah ee caafimaadka iyo badbaadada ee loo shaqeeyahaaga inta aad awoodid.

Haddii uu jiro sharci ama amarka caafimaadka dadweynaha oo jira oo kaa doonaya in lagaa tallaalo, waxaad u baahan kartaa in lagaa tallaalo si aad uga shaqeysid, ama aad u sii wadatid ka shaqeynta, shaqadadaas.

#### Loo-shaqeeyahaagu ma inuu ila hadlaa kahor inta aan looga baahneyn tallaalka goobta shaqadeyda?

Haa. Haddii loo-shaqeeyahaagu tixgelinayo siyaasad tallaalka oo khasab ah, waa inay la tashadaan adiga iyo wakiilkaaga caafimaadka iyo badbaadada, haddii ay jiraan, ka hor inta aaney wax tallaabo ah qaadin. Waa inaad u sheegtaa haddii ay jirto sabab aan lagu tallaali karin.

## **Waa lay talaalay. Weli miyay tahay inaan qaato taxaddarro kale sida kala-fogaanshaha jidhka iyo gacmo-maydhista?**

Haa. Tallaal badbaado leh oo wax ku ool ah waa qeyb ka mid ah ilaalinta bulshada oo caafimaad qabta. Sii wad inaad qaaddo talaabooyinkan si aad uga hortagtid faafitaanka COVID-19:

- raac amarrada caafimaadka bulshada
- Ha tagin shaqada marka aanad caafimaad qabin, ama aad leedahay calaamadaha COVID-19 ama ay saraakiisha caafimaadku kuu sheegeen in aad guriga joogtid
- samee wax kasta oo macquul ah oo aad ugu shaqeyn kartuid si nabadgelyo leh, oo ay ku jiraan ilaalinta kontaroolada loo dhigey COVID-19 sida kala fogeynta jidhka iyo nadiifinta
- raac tilmaamaha
- Weydii haddii aadan hubin sida aad si ammaan ah ugu qabatid shaqada
- isticmaal qalabka difaaca shaqsiyeed (PPE) sida galoofyada habka lagu tababaray ee lagu faray inaad u isticmaashid
- u soo sheeg kormeerahaaga ama wakiilkaaga caafimaadka iyo badbaadada xaalad kasta oo aan ammaan ahayn

## **Macluumaad dheeraad ah**

- [Macluumaadka caafimaadka iyo tallaalada - Waaxda Caafimaadka](#)
- [Shaqee caafimaadka iyo badbaadada - Shaqada Badqabka Australiya \(Work health and safety - Safe Work Australia\)](#)
- [Xuquuqda Meesha shaqada - Fair Work Ombudsman](#)